

Isku qoridda Miraha Dugsiga

Ku Waalidka/qofka carruurta mas'uul ka ah

Miraha iyo khudaarta dugsiga waxaa maalintii marka dugsiga la joogo laga helaa tamar iyo xoog, waana arrin muhiim u ah caafimaadka fiican ee hadda iyo hadhowba. Dugsigaaga waxaa ka jira nidaam miro iyo khudaar lagu helo kaasoooo ay ardayda oo idil ay is qori karaan.

Nidaamka waxaa kaba dawladda, waxayna ku kabtaa 1 karoon halkii miraba, dadka carruurta mas'uulka ka ahna waxay halkii miraba ka bixinayaan 2,50 karoon. Dugsiga ayaa ka go'aan gaaraya maalmaha miraha la qaybinayo, dadka carruurta mas'uulka ka ahna waxay lacagta bixinayaan keliya maalmaha uu ardaygu miro helo. Tusaale ahaan dugsi ayaa wuxuu xilli dugsiyeedka guga miro qaybin karaa 100 maalmood kuwaas oo qiimahoodu noqonayo 250 karoon ardaygiiba. Waxaad warbixin intaan ka badan oo ku saabsan Isku qoridda Miraha Dugsiga ka akhrisan kartaa www.skolefrukt.no

Haddii aadan haysan Internett, ama aad su'aal qabto, waxaa maalin walba saacadaha 08.00 – 17.00 lagugu caawin karaa telefoonka 815 20 123.

Ilmahaaga waxaa la siinayaa:

Ardayda waxaa la siinayaa hal miro ah maalintiiba, Miraha inta badan la bixiyana waxaa ka mid ah tufaax, moos, cambaruud, kiwi, liin-bambeelmo, liinta yaryar (klementin), iyo miraha nektarin iyo fersken. Waxaa kale oo waxyaalaha la bixiyo ka mid noqon kara dabacase. Waxyaalaha la bixinayo waxay ku xirnaan doonaan xilliga iyo xaaladda degaan walba.

Haddii aad rabto in aad ilmahaaga qorto Isku qoridda Miraha Dugsiga, soo buuxi foomka qorista ee ku yaalla halkan www.skolefrukt.no. Marka aad is qorto waxay ku haynaysaa ilaa sanad nuskii.

Mahadsanidiin,

Isku qoridda Miraha Dugsiga